



## Tartanka Dastuurka Gobolka oo sii sagootin u ah tababaraha Franklin

Tartankii sanadlaaha ahaa ee Dastuurka ee Anaga oo Dadka ah “We the People” ee horyaalnimada dugsiga sare ee gobolka ayaa lagu soo bandhigay dhacdadii sida caadiga ah xiisaha lahayd oo dhex martay mid ka mid ah labada dhinaca ee sidaaadka ah iskaga soo horjeeda – Grant vs. Lincoln. Laakiin marka laga yimaado loolanka ka jira Mark O. Hatfield Courthouse, arrin kale oo dareen ayaa dhici doonta:

Tartanka sii sagootin ah ee loogu talagalay tababaraha Franklin ee Portia Hall.

Hall, oo ah macclimad cilmiga bulshada dhigta oo ka tirsan Franklin, waxay ku jirtaa sanadkii 15<sup>aad</sup> ee ay tahay tababaraha kooxda Dastuurka ee Franklin. Ka dib tartanka Sabtida, waxay mas’uuliyadaha tababareed ku wareejin doontaa macallinka ay wada dhigaan cilmiga bulshada ee David Marsh. Sababta: Waxay leedahay uur iyada oo sida mataano, oo waqtiga ay dhalaysaa ku beegan yahay Luulyo.

“Waa saacada badan oo dheeraad ah,” ayay sheegtay Hall. “Laakiin aad ayaan uga murugeysnahay in aan iska daayo.”

Franklin waxay noqon doontaa mid ka mid ah afarta Dugsiyada Dadweynaha Portland ee ku jira tartanka, iyada oo ay weheliyaan Lincoln, Grant iyo Cleveland. Laakiin waxay u badan tahay in aanu qofna dareen shucuur leh u yeelan sida Hall oo kale. Waxay PPS wax ka soo baraysay muddo 22 sano ah, iyada oo fasalka Dastuurka ee Franklin ku bilowday fasal qayb ahaan buuxa sanadkii 2003-04. Markii la gaaray 2005-06 waxay lahayd fasal gaar ah iyo koox tababarayaal ah oo mutadawaciin ah.

Inkasta oo tababarka socda sanadku ay horseedeen in la gaaro tartamada gobol weynaha iyo gobolka, marka la eego Hall alaabmarinta shaqo waxaa sababta u ah waxa ay ugu yeerto “mucjisooinka” ay ka aragto ardaydeeda.

“Carruurta xishoodka badan waa in ay bartaan hadalka, iyada oo carruurta hadalka badanina ay tahay in ay bartaan wax dhageysiga,” ayay sheegtay Hall. “Carrruurta faanka badani waa in ay helaan caddeyn, iyada oo carruurta aan ka duwanaynin ay heleen naxariis. Waana in ay dhammaantood wada shaqeeyaan.”

Ilaa muddada 15 sano ah, waxay ardayda u hagtay/tilmaantay in ay helitaanka codkooga, iyada oo fiirsatay iyaga oo ka soo gudbay dhinaca kale oo noqday dad waaweyn ah.

“Qaar ka mid ah ardayda samaysay barnaamijkani waxay noqdeen qareeno, siyaasiyiin, macallimiin, xubno ka tirsan ciidamada, dad wax u dhaqdhaqaqa iyo hoggaamiyaasha bulshada,” ayay sheegtay Hall, oo qorshaynaya in ay sii wado wax barida. “Laakiin kuwo kale ayaa qabtay waxyaabo kale oo badan laga bilaabo musharixiinta dhanka PhD ee biology-ga iyo cilmiga waxyaabihii qadiimiga ah ‘archeology’ ilaa laga gaarayo heesayaasha opera.”

Tartanka Sabtida wuxuu u muuqdaa in uu mar kale noqonayo mid ay kaga soo horjeedaan oo u dhexeeya Grant, oo ah kooxda difaacanaysa horyaalka, iyo Lincoln, oo ay si adag iskaga soo horjeedaan sida wiilasha kubadda kolayga ee Jefferson iyo Grant oo kale. Tartanka, oo bilaabmay 1987-kii, waxaa sanad kasta ku guuleystay Grant ama Lincoln midkood, iyada oo Grant ay ku guuleysatay markii 12<sup>-aad</sup> sanadkii 2018-kii, iyo Lincoln oo ku guuleysatay 19-ka kale.

Dugsiga guuleystaa wuxuu u gudbayaa tartanka qaranka oo lagu qaban doono Washington, D.C., oo dhacaya Abriil. Sanadkii la soo dhaafay, Grant ayaa ku guuleystay horyaalka qaranka markii afaraad. Lincoln waxay ku guuleysatay lix horyaalada qaranka ah.